

QAADASHADA KAALMO DOWLADEED

Baarista Qaadasha Kaalmo Dowladeed ee Maamulka Trump wuxuu dhammaaday Maarso 9, 2021.

ISTICMAALKA BARNAAMIJYADA SIDA KUWA HOOS KU QORAN MA SAMEEYNAYAAN CODSIGA MUHAAJIRKA:



- Barnaamijka Kaalmada Nafaqada (SNAP, "EBT" ama "Food Stamps") iyo P-EBT
- Barnaamijka Nafaqada Haweenka, Dhallaanka iyo Carruurta (WIC)
- Bakhaarrada cuntada, raashinka, iyo barnaamijyada cuntada la diyaariyey



- Sanduuqa Caawinta Kirada ee Boston
- Guryeynta dadweynaha iyo Caawinta section 8
- Caawinta guryeynta ee loo maro barnaamijka Caawinta Deganaanshaha ee Qoysaska ku-Meel Gaarka ah (RAFT)
- Hoyga Gargaarka Deg degga ah



- Baarista COVID-19, daaweynta, iyo talaalka
- Caafimaadka guud (marka laga reebo daryeelka muddada dheer), Shabakadda Badbaadada Caafimaadka, Medicare, Caymiska Isku xiraha Caafimaadka
- Caymiska Naafada (SSDI)



- Deeqo
- Kharashaad kasta oo gargaarka COVID-19 ah
- Caawinta shaqo la'aanta
- Deymaha iyo deeqaha Maamulka Ganacsiga Yaryar (SBA)
- Caawinta bixinta daryeelka carruurta

Baaris ah Qaadasha Kaalmo Dowladeed ayaa weli lagu sameeyaa codsiyada muhaajiriinta qaarkood, laakiin waxaa KELIYA eey khuseysaa faa'iidooyinkan:

- Gargaarka lacageed ee dowladda (tusaale, TAFDC, EAEDC, SSI)
- Daryeelka muddada-dheer ee ay bixiso dowladda (tusaale guryaha daryeelka)

Su'aalo? **Wac 311** ama la xiriir Xafiiska Duqa Magaalada Boston ee Horumarinta Muhaajiriinta **617-635-2980** ama immigrantadvancement@boston.gov. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan Qaadashada Kaalmo Dowladeed, booqo boston.gov/immigrants.